

# MA WAXAA HAYSTA QOYSAAGA DHIBAATO GURI LA'AAN?



**Waxaan kaa caawin karnaa inaad hesho  
oo lagaa bixiyo daryeel caruur [child care]  
shatiyaysan oo tayo sare leh.**

Isla maantada hel meel laga bixiyo daryeelka  
caruurta adiga oo soo waca Xarunta Qoyska [Family  
Center] ka soo waca (800) 446-1114

## Maxay yihii adeegyada ay bixin karaan xarumaha daryeelka caruurta?

- Daryeel bixiyayaal u tabbabaran
- Taageero qoyska oo dhan loo fidio
- Daryeel iyo xanaano shaqsiyaysan
- Meel diiran, nadiif ah, oo ammaan ah
- Cunto caafimaadsan, oo nafaqo leh
- Ciyaaro iyo waxbarasho ilmaha ku maaweeloonaya

## Sideen ugu qalmi karaa?

- Haddii aad si ku meel gaar ah aad ula nooshahay qoys ama saaxiibbo
- Haddii aadan guri haysan
- Haddii aad ku nooshahay guryaha ku meel gaarka ah, baabuur ama darjiin
- Haddii aad degan tahay hoy kumeel gaarka ah
- Haddii aad ku nooshahay guryaha barnaamijka Rabshadaha Guriga [Domestic Violence]
- Daqli ahaan xaq ugu leedahay
- Sidoo kale waxaad ugu qalmi kartaa haddii aad ku jirto xaalado kale oo ku meel gaar ah

## Sideen kaalmo u bixinnaa?

- Waxaan kaa kaalmaynaynaa si aad u ogaato haddii aad xaq u leedahay inaad hesho kabitaan-dhaqaale ee xanaanada caruurta.
- Waxaan kaa caawinnaynaa in lagugu hago nidaamka kabitaanka dhaqaalaha ee dowladda iyo in aan kuula buuxino arjigaaga Isku Xirkha Shaqada ee Daryeelka Caruurta [Working Connections Child Care].
- Waxaan kaa caawinnaynaa in aad hesho meelaha caruurta lagu xanaaneeyo ee shatiyaysan kaa soo haqab tiri kara baahidaada iyo tan qoyskaaga.
- Waxaan kugu xiraynaa xarumo kale oo adeegyada ka bixiya oo xaafaddahaaga ku dhuxyaala.

*Fadlan ogsoonow: Adeegyada Badbaadinta Ilmaha [Child Protective Services (CPS)] ilmahaaga kaama qaadayaan maxaa yeelay how la'aanta ku haysata darteed. Hoy la'aan micnaheedu ma ahan ku-tagri fal ilmo ama dayacid.*

## Waa maxay waxa aan ubaahanahay inaan sameeyo?

Soo wac Xarunta CCA of WA Family Center  
wac (800) 446-1114 ama email ahaan nagula  
soo xiriir: [familycenter@childcare.org](mailto:familycenter@childcare.org)

Ama si toos ah u soo wac DSHS si aad  
u buuxiso (877) 501-2233 ama qatka  
internetka: [www.washingtonconnection.org](http://www.washingtonconnection.org)

Adeegyadeena aan ugu talagalnay qoysaska guri la'aanta waxaa fidiyay Xarunta Qoyska Washington ee Wacyigelinta Daryeelka Caruurta [Child Care Aware of Washington Family Center], waxaa fuliya Ilaha Daryeelka Caruurta [Child Care Resources], oo si deeqsi ahaan gacan uga geysta Waaxda Waxbarashada Hore ee Gobolka Washington [Washington State Department of Early Learning].



Department of Children, Youth, and Families